# Xeerarka dugsiyada xannaannada iyo guryaha xilliga firaaqada

Luulyo 2020

Piteå kommun

# Ku soo dhawaw dugsiyada xannaannada iyo guryaha xilliga firaaqada ee degmada Piteå

## Dugsi xannaano

Dugsiga xannaannadu wuxuu noqon karyaa mid ay degmada leedahay ama mid gaar loo leeyahay, waxaana loogu tala galay carruurta 1-5 jirrada ah. Canuggu wuxuu degmada  xaq ugu leeyahay hal meeleyn oo keliya
Canuggu xaq uma laha in uu laba degmo ku meeleysnaado isku hal mar. Degmadu waxay canugga u soo bandhigeysaa shan meelood oo uu kala dooran karyo:

### 1. Marka uu waalidku shaqeeyo ama waxbarto

Degmada uu qofku degganyahay ayaa mas'uul ka ah in canugga Iswiidhan deggan, ee ay waaliddiintiisu shaqeeyaan ama waxbartaan, uu dugsi xannaano boos ka helyo waqti u dhigma waqtiga shaqada ama waxbarashada oo ku jiryo waqtiga safarku. Marka waalid shaqeeya uu baagamuuddo noqdo wuxuu si qoraal ah ku soo gudbinayaa taas isagoo adeegsanaya **www.pitea.se/barnplacering**

### 2. Marka uu waalidku shaqo raadi yahay

Carruurta ay dhaleen waaliddiinta shaqo raadiska ah 15 saac ayey usbuuci xaq u leeyihiin dugsi xannaano. Marka uu shaqa doonku shaqo helo waxaa qoraal ahaan loo soo gudbinayaa codsi waqti kordhin iyadoo la soo marsiinayo **www.pitea.se/barnplacering**

Maamulaha mas'uulka ah ayaa xaq u leh in uu jadwalka canugga go'aan ka gaaryo marka uu canuggu 15 saac dhigto dugsiga xannaannada, iyadoo taasi ku xiran hadba duruufaha dugsiga xannaannada.

### 3. Marka uu waalidku fasax waalid kula jiryo walaal 1-5 sana jir ah

Marka uu qofku walaal helyo, oo uu ku jiryo fasax waalid, ka hor ama ka dib marka uu canuggu dhasho, dib u habeyn ayaa meeleynta walaalka ama walaalaha da'doodu u dhexeyso 1-5,  lagu sameynayaa,  oo waxaa meeleynta laga dhigayaa 15 saacadood ka dib marka ay wargeline ka timaado Riksskatteverket.

Maamulaha mas'uulka ah ayaa xaq u leh in uu jadwalka canugga go'aan ka gaaryo marka uu canuggu 15 saac dhigto dugsiga xannaannada, iyadoo laga duulayo hadba duruufaha maxalliga ah ee waaxda dugsiga xannaannada.

Marka uu waalidku ku laabanayo shaqada ama waxbarashada waxaa la soo gudbinayaa codsi cusub iyadoo la soo marinayo **www.pitea. se/barnplacering**

Waxaa boos leesi siinayaa 4 bilood gudohood.

### 4. Dugsi guud oo xannaano oo loogu tala galay carruurta da'doodu u dhexesya seddax ilaa iyo shan sano

Dhammaan 3-5 jirradu, waxay 525 sacadood xaq u leeyihiin sanadkiiba dugsi guud oo xannaano. Waxaa boos dugsiga xannaannada leeska siinayaa laga billaabo xilli dugsiyeedka deyrta ee sanadka uu canuggu buuxinayo seddax sano. Dugsiga guud ee xannaannadu wuxuu raacayaa jadwalka dhigashada- iyo fasaxyada iskoolka taasoo ka dhigan in carruurta dhigata dugsiga guud ee xannaannadu ay fasax yihiin fasaxyada iskoolka. Marka uu shaqeynayo ama waxbaranayo waa in in uu codsi qoraal ah ku soo gudbiyo **www.pitea.se/barnplacering** waalidku.

Waxaa boos leesi siinayaa 4 bilood gudohood.

Maamulaha mas'uulka ah ayaa xaq u leh in uu jadwalka canugga go'aan ka gaaryo marka uu canuggu 15 saac dhigto dugsiga xannaannada, iyadoo laga duulayo hadba duruufaha maxalliga ah ee waaxda dugsiga xannaannada.

.

5. Xannaannada waqtiga shaqada ee aan raaxada lahayn (Habeenle)

   Waqtiga shaqada ee aan raaxada lahayn ama aan joogtada ahayn waxay degmadu bixineysaa xannaano. Eeg cinwaanka loogu tala galay baahida boos loo qabo waqtiyada shaqada ee aan raaxada lahayn ama aan joogtada ahayn.

## Codsashada dugsiga xannaannada

Waalidka boos dugsi xannaano baahi u qaba wuxuu codsi sameynayaa isagoo gudaha gelaya.

Codsiga waxaa la sameynayaa iyadoo la gelayo **www.pitea.se/barnplacering**

Haddii Agoosto/Sabteembar boos laga rabo dugsiga xannaannada waa in uu maamulka waxbarashada codsigu soo gaaraa ugu dambeyn **31 maarso.**
Haddii bisha Jannaayo/Faberaayo boos laga rabo dugsiga xannaannada waa in uu maamulka waxbarashada codsigu soo gaaraa ugu dambeyn **15 Sabteembar.**
Maamulka waxbarashada wuxuu hadafkiisu yahay in uu boos qofka ku siiyo muddo 4 bilood gudohood ah laga billaabo marka uu codsigu soo gaaryo ama 4 bilood ka hor taariikhda ay meeleyntu billaabaneyso.
Marka carruur la meeleynayo waxaa la tixgeliyaa rabitaanka waalidka iyo u dhawaashada dugsiga xannaannada ilaa inta ay suurta gal tahay. Gacanta koowaad waxaa qofka boos laga siinayaa aagga uu codsaday, gacanta labaad iyo gacanta seddexaadna waxaa qofka boos laga siinayaa meeshi uu boos ka bannaanyahay.
Taariikhda dhalashada ee canugga ayaa taariikh ahaan u taagan safka meeleynta. Walaalaha yar-yar taariikh saf ahaan waa ay u xisaabsan karaan taariikhda dhalashada ee walaalaha ka waaweyn ilaa iyo 31 Luulyo ee sanadka uu walaalku 6 sano buuxinayo.
Marka uu codsigu yimaado ayaa canugga lagu qorayaa liiska safka.

Waalidka waxaa codsiga loogu xaqiijinayaa khadka e-mailka.

Haddii uu waalidku aqbalyo booska la siiyay waa in taas lagu xaqiijiyaa iyadoo gudaha la gelayo muddo usbuuc gudeheed ah
Haddii xaqiijintu aysan ku imaannin waqtiga la gooyay gudihiisa waxaa taas loo arkayaa in waalidku uu booska diidyay, haddii ay baahiyo jirtana waa in codsi cusub la soo gudbiyaa oo la sugaa afar bilood oo cusub oo arrinka la maareynayo.
Waqtiyada furnaanta ee dugsiga xannaannadu waa 06:00-18:30
Ha illoobin in aad ku xisaabtantid waqtiga la qabsashada xannannada ee canugga. Waqtiga la qabshada waxaa lagu qiyaasayaa 1-2 usbuuc.
Haddii uusan canuggu muddo 30 maalood ah gudohood ku billaabin dugsiga xannaannada ee lagu heshiiyay in uu billawyo wuu luminayaa boos, waana in codsi cusub markaas lagu soo gudbiyaa.
**www.pitea.se/barnplacering**

# Fasalka dugsiga xannaannada

Haddii uu canug billaabayo fasal dugsi xannaano uma baahna waalidku in uu iska celiyo booska dugsiga xannaannada ee degmada haddii uu boos ka doonayo guriga xilliga firaaqada.
Marka uu waalidku canugga ku qoryo fasalka dugsiga xannaannada ee waaxda iskoolka wuxuu boos ka helayaa guriga xilliga firaaqada. Waxay taasi ootomaatik u dhiceysaa maalinta shaqo ee ugu horreysa ee ku xigta furitaanka guriga xilliga firaaqada ee xagaaga. Macluumaadka ku aaddan furnaanta hawlaha dugsiga xannaannada/iskoolku waxay ku jiraan bogga intarneetka. Haddii marka uu canuggu billaabayo fasalka dugsiga xannaannada aan boos laga rabin guriga xilliga firaaqada waa booska si qoraal ah leesaga celiyaa iyadoo la adeegsanayo **www.pitea.se/barnplacering u**gu dambeyn 31 May.

# Guriga xilliga firaaqada

Carruurta waaliddiinta shaqeeya, waxbarta boos ayey xaq ugu leeyihiin guriga xilliga firaaqada. Guriga xilliga firaaqadu wuxuu jiryaa isagoo ay degmadu leedahay iyo isagoo gaar loo leeyahay, waxaana loogu tala galay carruurta billaabeysa fasalka dugsiga xannaannada/iskoolka ilaa iyo xilli dugsiyeedka guga ee sanadka uu canuggu buuxinayo 13 sano.

Waxaa booska xilliga firaaqada leesi siiyaa sida ugu dhakhsi badan ee ay u soo baxdo in uu canuggu u baahanyahay boos noocaas ah. Waxaa ka horreyn kara waqti arrinka gacanta lagu hayo.

Waxaa codsiga lagu soo gudbinayaa **www.pitea.se/barnplacering**

Marka uu qofku walaal helyo, oo uu ku jiryo fasax waalid, ka hor ama ka dib marka uu canuggu dhasho, waa la soo afjarayaa meeleynta ka dib marka ay wargeline ka timaado Riksskatteverket.
Guriga xilliga firaaqadu wuxuu furanyahay 06.00-18.30.
Guriga xilliga firaaqada ee loogu tala galay carruurta waaweyn ee hawliliisu khuseeyaan fasallada 4–6 waa ay kala duwanaan kartaa waqtiyada uu furanyahay.
Haddii uusan canuggu muddo 30 maalood ah gudohood ku billaabin guriga xilliga firaaqada ee lagu heshiiyay in uu billawyo wuu luminayaa boos, waana in codsi cusub markaas lagu soo gudbiyaa haddii ay baahiyo timaado. Canuggu wuxuu degmada  xaq ugu leeyahay hal meeleyn oo keliya. Canuggu xaq uma laha in uu laba degmo ku meeleysnaado isku hal mar.

Waxaa canugga lau meeleynayaa guriga xilliga firaaqada ee meesha uu iskoolka ka dhigto.

# Dugsiyada furan ee xannaannada (Guriga Qoyska)

Goobo kulan oo u furan dadka waaweyn iyo carruurta 0–6 jirrada ah.
**www.pitea.se/Invanare/Skola/Forskola/oppen-forskola/**

# Waqti shaqo oo aan raaxo lahayn iyo mid aan joogto ahayn (Habeenle)

Haddii ay jirto baahi fiidadki, habeennadi ama maalmaha fasaxa loo qabo xannaano carruureed waxaa bartamaha Piteå ku tallo xannaano loogu tala galay waqtiga aan raaxada lahayn.
Degmada Piteå xannaano carruureed ayey siineysaa carruurta waalidkoodu shaqeeyo fiidadki, habeennadi iyo maalmaha fasaxa. Waqtiyada furnaanta ee habeenluhu waa isniin – jimco 17.00 – 08.00. Fasaxyada wuxuu furanyahay habeen iyo maalinba.
Waqtiga carruurta la keenayo Habeenlaha waxaa xukuma jadwalka shaqada ee waalidka, laakiinse ugu horreyn 17.00 maalmaha shaqada.
Xannaannada carruurta waxaa la siinayaa oo keliya carruurta ku qoran dugsiga xannaannada ama guriga xilliga firaaqada, wuxuuna khuseeyaa oo keliya:

1. Waalidka keligiis carruur ka mas'uul ah: Oo haya shaqo ka dhigan in uu shaqeeyo waqtiyo shaqo oo aan raaxo lahayn wuxuu xaq u leeyahay xannaanada waqtiga aan raaxada lahayn.
2. Waalidka mas'uuliyad la wadaaga waalid kale oo ay isku cinwaan ku qoranyihiin: Halkaas oo ay labada waalidba shaqeeyaan waqtiyo shaqo oo aan raaxo lahayn waxay xaq u leeyihiin xannaanada waqtiga aan raaxada lahayn.
3. Waalidka mas'uuliyad la wadaaga waalid kale oo ay cinwaanno kala duwan ku qoranyihiin: Halkaas oo ay labada waalidba shaqeeyaan waqtiyo shaqo oo aan raaxo lahayn waxay xaq u leeyihiin xannaanada waqtiga aan raaxada lahayn. Waalidka mas'uuliyad la wadaaga waalid kale, oo ay Degmada Piteå ku kala qoranyihiin cinwaanno kala duwan waxay xannaannada waqtiga aan raaxada lahayn xaq u leeyihiin haddii loo qiil dayo oo keliya haddii hal waalid oo keliya uu shaqeeyo waqti shaqo oo aan raaxo lahayn.

Waxaa codsiga lagu soo gudbinayaa **www.pitea.se/barnplacering**
Lacag khidmo ah oo dheeraad ah leeskula soo dallacan maayo waqtiga shaqada ee aan raaxada lahayn.

# Macluumaad wadaag ah oo khuseeya dugsiyada xannaannada iyo guriga xilliga firaaqada

## Macluumaad

Habeenka krismaska, sanadka cusub iyo bartamaha xagaaga iyo dhammaan maalmaha guduudan waa ay xiranyihiin dugsiyada xannaannada/guryaha xilliga firaaqadu.

Haddii uu canuggu boos haysto laakinse uusan waqti dheer imaannin, qof loo doortay oo ka shaqeeya Maamulka waxbarashada ayaa xaq u leh in uu wakiil ahaan canugga booska ka saaryo isagoo aan waqti siin.
Fiiro gaar ah u lahaw in aad lacag khismo ah bixineysaan laga billaabo taariikhda booska leydin siiyay.

## Waxyaabaha ay tahay in la sameeyo marka uu canug xanuunsado

Sida ku cad talooyinka Hey'adda caafimaadka bulshada waxaa guud ahaan jirta in carruurta feebaro ama sabab kale awgeed u dareemaya daal iyo laayac-laayac, ay u baahanyihiin in ay guriga joogaan oo ay nastaan. Marka ay koox ahaan carruurtu isugu ururto si fudud ayaa sidoo kale loo faafin karaa cudurka. Afar iyo labaatan saac oo feebaro la'aan ah iyo 48 saac oo mantag/shuban la'aan ah, haddii uu calool xanuun jiryo, ayaa ah xeerka aasaaska ah.

## Fasax

Canuggi boos ka heysta dugsi xannaano ama guriga xilliga firaaqada waxaa lagula talinayaa in uu ugu yaraan afar usbuuc oo isku xigta fasax ka ahaado koox la jiridda intii hal sano oo kalandaariyo gudihiisa ah. Marka uu waalidku fasax shaqo ku jiryo ama fasax kale waa in canuggu uu ka joogyaa dugsiga xannaannada iyo guriga xilliga firaaqada.
Si fasaxyada dhaadheer hawlaha shaqada leesugu duwi karo waxaa waqti leeska siin karaa dugsiyo go'an oo xannaano iyo guryo xilli firaaqo.
Dugsiyada xannaannada iyo guriga xilliga firaaqadu waxay sanadka oo dhan xirnaanayaan 3 maalin oo buuxbuuxda iyo 2 maalin bar oo la sameynayo qorshe iyo aqoon kororsi.
Boos ayaa dugsi kale oo xannaano/guri xilli firaaqo leeska siin karaa haddii ay baahiyo jirto. Waxaa baahida horay loo soo sheegayaa, ugu yaraan laba usbuuc ka hor.
Maalmahaas wax lacag khidmo ah oo leesaga dhimaayo ma jiraan.

## Boos iska celin

Waqtiga boos iska celintu waa 60 maalmood oo laga tirinayo taariikhda ay boos iska celintu soo gaartay maamulka waxbarashada. Boos iska celinta waa in ay labada waalid soo gudbiyaa iyagoo gelaya **www.pitea.se/barnplacering**
Inta waqtiga boos iska celintu ay socoto waaliddiintu xaqbey u leeyihiin in ay booskooda uga faa'iideystaan sida jadwalka waafaqsan. Waxaa wada xaajood lala gelayaa maamulaha mas'uulka ah.

## Lacago khidmo ah/Qiimo go'an

Cidda booska haysata waxaa waajib ku ah in ay bixiso lacag khidmo ah. Cidda booska haysata waa waalidka soo codsaday booska ee oggolaaday marki la siiyay.
Haddii ay jirto cid keligeed booska haysata iyada ayaa lacagta lagu soo dallacanayaa. Haddii ay jiraan laba qofood oo booska haysata, ayna isla degganyihiin si wada jir ah ayaa loogu soo dallacanayaa lacagta khidmada ah, mas'uul ayeyna iskala yihiin la bixiyo.
Haddii ay jiraan laba qofood oo booska isla haysatay oo aan isku cinwaan degganeyn, canugguna uu si kaltan ah ula degganyahay, labadooduna ay boos uga baahanyihiin dugsiga xannaannada-/ama guriga xilliga firaaqada, qof kasta qeybteeda ayaa lacagta khidmada ah lagu soo dallacanayaa ka dib marka uu codsigu yimaado.

Ciddi boos haysata oo aan bixin lacagta khidmada ah waa ay waayi kartaa booskeeda dugsiga xannaannada ama guriga xilliga firaaqada. Boos cusubna qofka lama siin karo ilaa inta uu deynku taaganyahay.
Haddii boos cusub loo baahanyahay marka deynka la dhiibo waa in codsi cusub lagu soo gudbiyaa **www.pitea.se/barnplacering**
Fiiro gaar ah u lahaw in lacagta khidmada ah leydinku soo dallacanayo laga billaabo taariikhda leydin siiyay booska.

# Xisaabinta lacagta khidmada ah

Halka laga duulayo marka la xisaabinayo lacagta khidmada ah waa dakhliga qoyska booska haysta oo la isu geeyo canshuurta ka hor. Qoys waxaa loola jeedaa qof keligeed carruur hayasta, kuwa is qaba iyo kuwa wada nool. Kuwa wada nool iyo kuwa is qaba xitaa haddii aysan lahayn carruur ay wadaagaan, waxaa saas oo ay tahay loo arkaa hal qoys, waxaana lacagta khidmada ah lagu saleynayaa dakhliga labadooda soo gala oo la isu geeyay, micnaha mushaarkooda canshuurta ka hor. Xagga 3-5 jirrada waa la dhimayaa lacagta khidmada ah maxaa yeelay dugsiga guud ee xannaannada oo u dhigma 525 saacadood/sanadkiiba waa lacag la’aan, Eeg ”Qiimaha go’an ee dugsiga xannaannada”.

# Dakhli soo gudbin

Marka uu canuggu boos ka helyo dugsiga xannaannada ama guriga xilliga firaaqada waa in macluumaadka dakhliga loo soo gudbiyaa maamulka waxbarashada iyadoo la soo marinayo **www.pitea.se/barnplacering**

Haddii aan la soo gudbin macluumaadka dakhliga, waxaa leesku soo dallacanayaa lacag khidmo oo u dhiganta lacagta ugu badan ee qiimaha go’an. Cidda booska haysata waxaa waajib ka saaranyahay in uu soo gudbiyo macluumaadka dakhliga haddii ay dakhliga ama xaaladda qoyska wax iska beddelaan.

Degmadu xaqbey u leedahay in ay macluumaadka dakhliga ka dalbato shaqabixiyaha, qasnadda ceymiska shaqa la’aanta ama hey’adda canshuuraha iyo diiwaangelinta dadweynaha.

# Dhammaan dakhliga ay canshuurtu ku waajibtay ayaa lagu saleynayaa lacagaha khidmada ah

Lacagaha khidmada ah waxaa bil walba lagu saleynayaa dakhliga oo jumlo ah (micnaha cashuurta ka hor).

- Mushaar iyo lacago kale oo shaqo la xiriira.
- Lacagta gunnada ah ee waaliddiinta guriga qoyska.
- Lacagta hawlgabka (maaha hawlgabka agoonta).
- Dulsaarka nolosha (qaar qiil loo dayo waa ay jiraan).
- Lacagta waalidka carruurta haya.
- Kaalmada xannaannada ee ka timaada Qasnadda Ceymiska qeybta ay canshuurtu ku waajibtay.
- Lacagta bukaan socodka/bukaanka.
- Lacagta shaqo la’aanta/ taageerada suuqa shaqada.
- Kaalmada khuseysa waxbarashada.
- Waxbarashada suuqa shaqada.
- Dheeraadka hawlaha ganacsiga ee dakhliga noociisa ah.

## Sidee, goormeesa la dhiibayaa lacagaha khidmada ah

Bishu marka ay dhammaato ayaa bil walba faatuuro loo soo dirayaa cidda booska haysata. Lacagta khidmada ah waxaa la bixinayaa 12 bilood oo bil walba ugu dambeyn 30:ka bisha markaas dhamaaneysa lacagta la bixinayo.

Lacagta ugu badan waxaa laga dhiibayaa canugga ugu yar (canugga 1) ee qoyska, lacagta khidmada ah ee badi ahaan ku xigta waxaa laga bixiyaa canugga da' ahaan ugu dhaw ee ka (canugga 2, ee ahaan kara canug dhigta guriga xilliga firaaqada). Laga billaabo canugga afaraad lama bixinayo wax lacag khidmo ah.

Mar walba faatuuro waa la soo dirayaa inta uu socdo waqtiga boos iska celintu oo 60 maalmood ah.

Ciddi boos haysata oo aan bixin lacagta khidmada ah waa ay waayi kartaa booskeeda dugsiga xannaannada ama guriga xilliga firaaqada.

## Jadwal keenidda iyo beddelidda heerka qiimaha go'an

Marka canugga boos laga siiyo dugsiga xannaannada/guriga xilliga firaaqada waa in cidda booska haysata ay nidaamka goobjoogitaanka gelisaa jadwal ku aaddan waqtiga uu canuggu joogayo iyadoo laga duulayo baahida ay qoysku qabaan, micnaha waqtiga shaqada-/waxbarashada oo uu ku jiryo waqtiga safarku. Maamuluhu wuxuu dalban karyaa caddeyn shaqabixiye iyo jadwal qoraal ah oo ka socda shaqabixiyaha. Marka meeleynta loo beddelayo shaqo la'aan, fasax waalidnimo ama shaqo/waxbarasho ku laabasho awgeed waa in nidaamka goobjoogitaanka la geliyaa jadwal cusub. Haddii la shaqeeyo/wax la barto inta lagu jiro fasaxa waalidka waa in caddeyn la soo raacsiiyaa jadwal beddelka, halkaas oo ay ka muuqato in aadan wax lacag ah ka qaadan Qasnadda Ceymiska. Haddii shaqo la'aan la yahay waa in taas qoraal ahaan loogu soo sheegaa maamulaha dugsiga xannaannada/guriga xilliga firaaqada ee uu canuggu dhigto. Maamulaha ayaa isbeddelka ku wargelinaya Maamulka waxbarashada.

# QIIMO GO'AN OO LOOGU TALA GALAY DUGSIYADA XANNAANNADA EE DEGMADA PITEÅ

Lacagtu waxay ku saleysantahay % dakhliga qoyska oo jumlo ah sida soo socota:

| | % dakhlig ka | Qiimaha go'an ee booska waqtiga buux 1 iyo 2- jirrada, laakin ugu badnaan | Qiimaha go'an ee carruurta baahida u qabta xannaano ka dheeri ah dugsiga guud ee xannaannaa 3-5 jirrada | Laakinse ugu badnaan |
|---|---|---|---|---|
| Canug 1 | 3 % | 1478 koron | 30 % dhimis (= 2,1 %) | 1035 koron |
| Canug 2 | 2 % | 986 koron | 30 % dhimis (= 1,4 %) | 690 koron |
| Canug 3 | 1 % | 493 koron | 30 % dhimis (= 0,7 %) | 345 koron |

Qoyska dakhligoodu ka sarreeyo 49 280 kronor waxay bixinayaa lacagta khidmada ee ugu badan.

Lacagaha khidmada ah ee loogu tala galay in ay bixiyaan kuwan dakhligood ka hooseeyo 16 000 oo koron bishiiba

Qoyskaska uu dakhligoodu marka leesu geeyo ka hooseeyo 16 000 oo koron waxay bixinayaa lacag khidmo ah oo hooseysa. Qoysaska uu dakhligoodu ka hooseeyo 7 000 oo koron wax lacag ah ma bixinayaan.

| | Hawlaha dugsi xannaannada (dugsi xannaano iyo xannaano baris la xiriirta) | | | Lacagta khidmada ee carruurta u baahan xannaano ka dheeri ah dugsiga guud ee xannaannada | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Dakhli | Canug 1 | Canug 2 | Canug 3 | Canug 1 | Canug 2 | Canug 3 |
| 15.000-15.999 | 2,7% | 1,8% | 0,9% | 1,9% | 1,3% | 0,6% |
| 14.000-14.999 | 2,4% | 1,6% | 0,8% | 1,7% | 1,2% | 0,5% |
| 13.000-13.999 | 2,1% | 1,4% | 0,7% | 1,5% | 1,1% | 0,4% |
| 12.000-12.999 | 1,8% | 1,2% | 0,6% | 1,3% | 1,0% | 0,3% |
| 11.000-11.999 | 1,5% | 1,0% | 0,5% | 1,1% | 0,9% | 0,2% |
| 10.000-10.999 | 1,2% | 0,8% | 0,4% | 0,9% | 0,7% | 0,1% |
| 9.000-9.999 | 0,9% | 0,6% | 0,3% | 0,7% | 0,5% | 0,1% |
| 8.000-8.999 | 0,6% | 0,4% | 0,2% | 0,4% | 0,3% | 0,1% |
| 7.000-7.999 | 0,3% | 0,2% | 0,1% | 0,1% | 0,1% | 0,1% |

*Baarlamaanka degmada ayaa go'aan ka gaaraya lacagaha khidmada ah ee dugsiyada xannaannada iyo xannaannada waxbaridda la xiriirta.*

# QIIMO GO'AN OO LOOGU TALA GALAY GURYAHA XILIGGA FIRAAQADA EE DEGMADA PITEÅ

Lacagtu waxay ku saleysantahay % dakhliga qoyska oo jumlo ah sida soo socota:

| | % dakhliga ka mida | Laakinse ugu badnaan |
|---|---|---|
| Canug 1 | 2 % | 986 koron |
| Canug 2 | 1 % | 493 koron |
| Canug 3 | 1 % | 493 koron |

Qoyska dakhligoodu ka sarreeyo 49 280 kronor  waxay bixinayaa lacagta khidmada ee ugu badan.

Lacagaha khidmada ah ee loogu tala galay in ay bixiyaan kuwan dakhligood ka hooseeyo 16 000 oo koron bishiiba

Qoyskaska uu dakhligoodu marka leesu geeyo ka hooseeyo 16 000 oo koron waxay bixinayaa lacag khidmo ah oo hooseysa. Qoysaska uu dakhligoodu ka hooseeyo 7 000 oo koron wax lacag ah ma bixinayaan.

| Dakhli | Canug 1 | Canug 2 | Canug 3 |
|---|---|---|---|
| 15.000-15.999 | 1,9% | 0,9% | 0,6% |
| 14.000-14.999 | 1,7% | 0,8% | 0,5% |
| 13.000-13.999 | 1,5% | 0,7% | 0,4% |
| 12.000-12.999 | 1,3% | 0,6% | 0,3% |
| 11.000-11.999 | 1,1% | 0,5% | 0,2% |
| 10.000-10.999 | 0,9% | 0,4% | 0,1% |
| 9.000-9.999 | 0,7% | 0,3% | 0,1% |
| 8.000-8.999 | 0,4% | 0,2% | 0,1% |
| 7.000-7.999 | 0,1% | 0,1% | 0,1% |

*Baarlamaanka degmada ayaa go'aan ka gaaraya lacagaha khidmada ah ee guryaha xilliga firaaqada.*